

Bayaanka Kormeeraha guud Jett ee Ku dhawaaqida Gudoomiyaha Gobolka

Maanta Guddoomiyaha Walz wuxuu ku dhawaaqay xiritaanka iskuuladayada inta ka hartay sanad dugsiyeedka 2019-2020 anoo raaceeno qodabka ah [20-41](#) Waxaan ka xunahay inaan awoodi doonin inaan ku soo dhaweyno ardayda dhismayaashayada laakiin aan fahamsanahay go'aannada Guddoomiyaha Gobolka ee badbaadada iyo wanaagga ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska. Waxaa mahad leh dadaalka iyo shaqada adag ee macallimiinteena, shaqaalaheena, iyo maamulayaasha, waxaan diyaar u nahay inaan sii wadno gaarsiinta tilmaamaha iyadoo loo sii marayo Barashada Fogaanta ee guriga. Waxaa naga go'an inaan soo bandhigno khibrado adag oo waxbarasho iyo xiriir macno leh oo aan la leenahay ardaydeenna oo dhan. Qoysasku waxay filan karaan sii wadista cuntada iyo xanaanada caruurta oo loogu tala galay shaqaalaha gurmada.

Xilliyadan aan la hubin, waxaan ku dadaaleynaa inaan ku siino xiriir isgaarsiin oo cad oo waqtiga ku habboon. Hoos waxaa ku yaal macluumaad muhiim ah oo ku saabsan waxa la filan karo inta ka hartay sannad-dugsiyeedka.

- Iskuulada St. Cloud waxay raacidoonaan jadwalkaagii hore iskuulka ee ahaa in ay 29ka May u aqoonsada ama thay maalinta ugu dambaysa ee waxbarida ama waxbarashada.
- Dugsiga Sare ee Gobolka Minnesota ayaa baajiyay dhammaan Hawlihii tartamada ee xiliga Guga.
- Gudoomiyaha wuxuu amar ku siiyay 1da May iyo 4ta May in ay noqoto maalmo aan casharro la siinin ardayda iyo gobolka oo dhan, balse ay noqoto maalmo horumarineed xaga xirfadaha shaqaalaha taasoo qasab ah.
- Bixinta cuntada iyo xanaanada cunugga ee shaqaalaha gurmada ayaa la bixin doonaa 1da May iyo 4ta May.

Maalmaha soo socda, degmada iyo maamulka dhismayaasha waxay idinla soo wadaagi doonaan faahfaahin dheeraad oo muhiim ah. Waxaan la shaqeyneynaa shaqaalaha, qoysaska, iyo ardayda si loo abuur qorshooyin isdaba joog ah dhacdooyinka muhiimka ah ee dhamaadka sanadka sida qalinjabinta.

Waxaa mahad mudan ardaydeena laqabsashadooda, adkeysiga, iyo shaqada adag iyo qoysaskeena sida ay u taageerayaan barashada guriga marka lagu jiro waqtiyadan aan caadiga aheyn. Waan ka mahadcelineynaa wadashaqeyntiina.

Willie Jett  
Kormeeraha Guud